

## Dhakhaatiirta bulshada ayaa dhawaan bixin doona talaalada

Maarso 16, 2021

---

Dhakhaatiirta bulshada ayaa dhawaan bilaabi doona maamulka tallaalka KOOFID-19, iyagoo caawinaya dad badan oo reer Alberta ah inay helaan qiyaastooda sida ugu dhakhsaha badan.

Caafimaadka Alberta (Alberta Health) waxay la shaqeyneysay Ururka Caafimaadka ee Alberta (AMA) si loogu daro dhakhaatiirta bulshada qorshaha qaybinta talaalka iyadoo la kordhinayo tallaalka.

Tan waxay keentay in ka badan 500 oo dhakhaatiirta Alberta iyo rugaha caafimaadka ee gaarka ah ay ku muujinyaan iney daneynayaan. Marka la isku daro, 185 goobo caafimaad oo ka kooban 1,100 dhakhtar ayaa abuuri doona awood dheeri ah qiyaastii 14,000 qaadasho maalinle ah, sida saadka u ogolaado. Dhakhaatiirta qaarkood waxay horeyba uga caawinayaan Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) maamulidda talaalka.

Dhakhaatiirta ugu horeysa ee bulshada ayaa laga filayaa inay bilaabaan maamulida talaalada xarumahooda caafimaad bisha Abriil. Xeerar cusub oo ku meelgaar ah ee ku saabsan kharashka ayaa lagu darayaa jadwalka faa'idada caafimaad si loogu ogolaado takhaatiirta inay u soo diraan adeeggan. Qoraal caafimaad oo faahfaahinaya ayaa la soo saari doonaa maalmaha soo socda.

Qorshaynta waxay ku socotaa rugaha caafimaadka degdega ah ee ku lugta leh dhakhaatiirta iyo xirfadlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka oo loo isticmaali karo mustaqbalka, haddii loo baahdo. Xarumahan caafimaad ayaa la isticmaali doonaa haddii Alberta ay hesho koror ballaaran oo xagga tallaalka ah.

Ilaa hadda, in ka badan 368, 000 qiyaasood oo ah tallaalka KOOFID-19 ayaa laga bixiyay Alberta, iyada oo in ka badan 91,000 oo qof si buuxda loogu tallaalay laba qiyaasood.

### Xaqiiqooyin degdeg ah

- Alberta waxaa ku nool qiyaastii 5,600 dhakhaatoorta qoyska
- Caafimaadka Alberta (Alberta Health) iyo Ururka Gaadiidka Alberta (Alberta Motor Association, (AMA) waxay si wada jir ah u shaqeynayaan si loo hubiyo keenista talaalka Alberta si wax ku ool ah oona hufan loogu faa'iideeyo reer Alberta ayna helaan xog si ay ugu wargeliyaan go'aanadooda tallaal ee laga helo ilaha lagu kalsoon yahay.

### Xog la xiriirta

- Xogta KOOFID-19 ee loogu talagalay reer Alberta ([COVID-19 info for Albertans](#))
- Qalabka Isku-Qiimeynta ee KOOFID-19 ([COVID-19 Self-Assessment Tool](#))

## Weydiimaha warbaahinta

Steve Buick

780-288-1735

Xoghayaha Saxaafadda, Caafimaadka

Shan Rupnarain

AED Arimaha Bulshada, AMA

*Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dowladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>*